GOLAHA WAKIILADA SOMALILAND
SOMALILAND HOUSE OF REPRESENTATIVES







# Warbixinta Shir-gudoonka ee

## Wax-qabadka Kal-fadhigii 8aad ee Golaha Wakiillada

*05 May 2024 illaa 04 July 2024*

***August 2024***

# ARRAAR

*Mudanayaal.*

Si aynu u gudano hawlaha inoo qorshaysan kal-fadhigan 8aad ee iminka aynu galnay isla markaana aynu u dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore oo aanu Goluhu Shaqooyin badan qaban, isla markaana ajandaha kal-fadhigii hore aynaan dhamaystirin.

Hadaba, si aynu u gudano Waajibaadkeena iyo hawlaha faraha badan ee inoo qorshaysan kal-fadhigan darteed waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa wax-qabadkii kal-fadhigii 8aad ee Golaha iyo wixii kale ee hawlo ah ama dhacdooyin ahaa ee mudaddii fasaxa ee ka dambeysay kal-fadhigaas.

# HORDHAC

Xeer-dejinta dalku waxay ka mid tahay Saddexda tiir ee Qaranku ku qotomo, sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, kuwaas oo kala ah Xukuumada (Excutive), Garsoorka (Judiciary) iyo Xeer-dejinta (Legislation).

Golaha wakiilladu waa mid ka mida ah labada aqal ee Baarlamaanka Somaliland ka kooban yahay, kuwaas oo kala ah (Guurtida iyo Golaha Wakiillada) oo marka la isku darro loogu yeedho Xeer-dejin ama Baarlamaan. Golahan Wakiillada ee la soo doortay 31 May 2021 waa Golihii labaad ee ku yimaada qaab doorasho toos ah, waana Golihii 5aad (afraad) oo ay ka horeeyeen afar gole, saddexda gole ee kale waxay ku yimaadeen hab-beeleed (xulasho). Afartaas Gole ee Golahan ka horeeyay waxay kala ahaayeen: -

- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay shirweynihii Burco **1991 - 1993** kana koobnaa **(111)** xubnood.
- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Boorama **1993-1997** kana koobnaa **(75)** xubnood.
- Golihii wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Hargeysa **1997-2005** kana koobnaa **(82)** xubnood.
- Golihii wakiilada ugu horeeyay shacabku si toos ah u soo doorto September 2005kii, **2005-2021** kana koobnaa **(82)** xubnood.

Golaha Wakiillada waajibaadkooda, tilmaamtooda Guud iyo Awoodoodu waa Xubno ka wakiil ah dadweynaha, waana qeybta 1aad ee Xeer-dejinta iyo ogolaanshaha iyo Illaalinta Siyaasada Guud ee dalka lagu hagayo iyo sidoo kale ansixinta heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soo saarid ama wax-ka beddelid qaanuun iyo sidoo kale Ansixinta Wixii Maaliyad khuseeya oo ka mid yihiin ansixinta Miisaaniyada, Ogolaanshaha Cashuuraha, Assaasida Keydka Dhakhliga Somaliland, Daabacada Lacagta iyo habeynta nidaamyada dhaqaale iyo kuwa lacageed, Sida ku cad Qodobka 39aad, Qodobka 53aad, Qodobka 54aad iyo Qodobka 55aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Qaab-dhismeed-ka guud ee uu Golaha Wakiiladu leeyahay waxa u dheer inuu leeyahay Guddiyo u kala xilsaaran hawlo iyo shaqooyin kala duwan, waxanay ka kooban yihiin 10 Guddi Sida ku cad Xeer-hoosaadka Golaha Xeer Lr. 01/2021. Goluhu wuxuu yeeshay kal-fadhigii 8aad mudaddii u dhexaysay 05 May 2024 illaa 04 July 2024, kal-fadhigaas oo ahaa kal-fadhigii 6aad horeeyay ee Golahan 5aad ee Wakiillada Somaliland. Hadaba warbixintan waxaynu ku soo koobaynaa Wax-qabadkii Golaha ee Kal-fadhigaas 6aad iyo mudaddii fasaxa ee ka dambeysay wixii uu qabtay.

# WAX-QABADKA KAL-FADHIGII 8AAD

***Wax-qabadkA Kal-fadhigii 8aad ee Golaha Wakiillada***

1. **Fadhiyadii Golaweynaha ee Kal-fadhigii 8aad** — **14 Fadhi**
2. Kulamadii Gudiyada Golaha Wakiiladu yeesheeyn — 29 Kulan
3. Isugaynta Fadhiyada iyo Kulamadii Gudiyada — 43 Fadhi/kulan

## Warbixinadii Golewaynaha laga hor akhirayay

| Taariikhda | Nooca Warbixinta | Cidii akhridey |
|---|---|---|
| 12/06/2024 | Warbixinta Gudoomiyaha Bangiga Dhexe ee Xeerka Rahanka Hantida Ma-uurtada ah | Md. Cali C/laahi Daahir<br>Gudoomiyaha Bangiga Dhexe |
| 26/06/2024 | Warbixinta Guddiga Arrimaha Bulshada ee Xeerka Hawlgabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha | Md. Axmed Jaamac Khaliif<br>Gudoomiyaha Gudidda |
| 03/07/2024 | Warbixinta Gudoomiyaha H. Shaqaalaha ee Xeerka Hawlgabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha | Md. Khaalid Jaamac Qodax<br>Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha |

## Xeerarka Goluhu Ansixiyay

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | U gudbay | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Xeerka Ciidanka Dab-damiska oo Guurtida ka soo noqday | Madaxweynaha | 07/05/2024 |
| 2. | Xeerka Ciidanka Qaranka Madaxweynuhu soo celiyay | Madaxweynaha | 30/06/2024 |
| 3. | Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidanka Guurtida ka soo noqday | Madaxweynaha | 03/08/2024 |
| 4. | Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada | Guurtida | 03/08/2024 |

## Masuuliyiintii Qaran ee Xilalkooda Goluhu Ansixiyay

| N | Magaca Masuulka | Xilka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Md. Siciid Maxamed X. Cismaan | Xubin Komishanka Doorashooyinka ah | 12/05/2024 |
| 2. | Md. Raabi Cabdi Maxamed | Wasiirka Wasaarada Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka | 12/05/2024 |
| 3. | Md. Axmed Maxamed Habane | Wasiirka Wasaarada Horumarinta Beeraha | 12/05/2024 |
| 4. | Md. C/naasir Muxumed Xasan (Buuni) | Wasiirka Wasaarada Xidhiidhka Golayaasha iyo Arrimaha Dastuurka | 12/05/2024 |
| 5. | Md. C/risaaq Muuse Faarax | Wasiirka Wasaarada Dhalinyarada iyo Ciyaaraha | 12/05/2024 |
| 6. | Md. Dr. Rooble Cabdi Cilmi | Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga | 12/05/2024 |
| 7. | Md. Dr. Axmed Yuusuf Idiris | Wasiirka Wasaarada Isgaadhsiinta iyo Teknolojiyada | 12/05/2024 |
| 8. | Md. Maxamed Maydhane Ibraahim | Wasiir Ku-xigeenka W. Xanaanada Xoolaha | 12/05/2024 |
| 9. | Md. Maxamed Yuusuf Cilmi | Wasrii ku-xigeenka W. Waxbarashada | 12/05/2024 |
| 10. | Md. C/laahi Axmed Faarax | Gudoomiye ku-xigeenka H. Shaqaalaha | 12/05/2024 |
| 11. | Md. Cumar Cali C/laahi | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 12/05/2024 |
| 12. | Md. Saleebaana Jaamac Diiriye | Wasrii ku-xigeenka W. Horumarinta Maaliyada | 12/05/2024 |

## Mashaariicda Sharci ee Golaha horyaal

### B. Mashaariicda ee Gudiyaddu gacanta ku hayaan

| N | Magaca Xeerka | Gudidda gacanta ku heysa |
|---|---|---|
| 1. | Mashruuc Sharciga Aasaaska Wakaalada Madbacada Qaranka | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 2. | Mashruuc Sharciga Jidaynta kabka H. Gobolada Barri iyo Nidaaminta Cashuuraha Dawladda dhexe u qabato dawldaha hoose | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 3. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Duulista Hawada | Gudidda Hawlaha Guud |
| 4. | Mashruuc Sharciga Aasaaska Kaydka Haamaha Shidaalka | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 5. | Xeerka Amniga Technology-yada iyo Dambiyada Technology-yada Casriga ah | Gudidda Hawlaha Guud |
| 6. | Xeerka Illaalinta Xogta Electronics-ka ah | Gudidda Hawlaha Guud |
| 7. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Wada-marita Gaadiidka | Gudidda Hawlaha Guud |
| 8. | Xeerka Xafiiska Imtixinaadka Qaranka | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 9. | Xeerka Laanta Socdaalka | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 10. | Xeerka Caasimada | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 11. | Wax ka badelka Xeerka Nidaamka Garsoorka | Gudidda Shuruucda, C. iyo X, Insaanka |
| 12. | Xisaab Xidhka Miisaaniyad sannadeedkii 2022gii | Gudidda Ilaalinta iyo D. H. Qaranka |
| 13. | Xeerka Rahnka Hantida Ma guurtada ah | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 14. | Wax ka badelka Xeerka Xanaanada Xoolaha | Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah |

### T. Xeerarka Gole Waynaha Horyaal

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Wax ka badelka Xeerka Maamulka Maaliyada | Golewaynaha |
| 2. | Xeerka Dakhliga Shidaalka | Golewaynaha |
| 3. | Wax ka badelka Xeerka Dakhliga Guud | Madaxweynaha ka soo noqday |

### J. Xeerarka Guurtida ku maqan

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada | Golaha Guurtida |

## GO'AAMADII GOLUHU GAADHAY

Kal-fadhigii 8aad intii lagu jiray Goluhu wuxuu sameeyay go'aano ansixineed oo gacan taag 15 jeer, go'aanadaas oo uu ku ansixiyay Xeerar, masuuliyiin qaran, Mooshino, qaraaro iyo meel marinta Ajandihii kal-fadhigaas, 15 kaas go'aana waxay kala ahaayeen: -

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | Go'aanka Ansixinta Ajandaha Kal-fadhiga 8aad | 06/05/2024 | Shir-gudoonka |
| 2. | Go'aanka Ansixinta Md. Siciid Maxamed X. Cismaan Xubin Komishanka Doorashooyinka Qaranka ah | 06/05/2024 | M/weynaha |
| 3. | Go'aanka Ansixinta Md. Raabi Cabdi Maxamed Wasiirka Wasaarada Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka | 12/05/2024 | M/weynaha |
| 4. | Go'aanka Ansixinta Md. Axmed Maxamed Habane Wasiirka Wasaarada Horumarinta Beeraha | 12/05/2024 | M/weynaha |
| 5. | Go'aanka Ansixinta Md. C/naasir Muxumed Xasan (Buuni) Wasiirka Wasaarada Xidhiidhka Golayaasha iyo Arrimaha Dastuurka | 12/05/2024 | M/weynaha |
| 6. | Go'aanka Ansixinta Md. C/risaaq Muuse Faarax Wasiirka Wasaarada Dhalinyarada iyo Ciyaaraha | 12/05/2024 | M/weynaha |
| 7. | Go'aanka Ansixinta Md. Dr. Rooble Cabdi Cilmi Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga | 12/05/2024 | M/weynaha |
| 8. | Go'aanka Ansixinta Md. Dr. Axmed Yuusuf Idiris Wasiirka Wasaarada Isgaadhsiinta iyo Teknolojiyada | 12/05/2024 | M/weynaha |
| 9. | Go'aanka Ansixinta Md. Maxamed Maydhane Ibraahim Wasiir Ku-xigeenka W. Xanaanada Xoolaha | 12/05/2024 | M/weynaha |
| 10. | Go'aanka Ansixinta C/laahi Axmed Faarax Gudoomiye ku-xigeenka H. Shaqaalaha Dawlada | 12/05/2024 | M/weynaha |
| 11. | Go'aanka Ansixinta Cumar Cali C/laahi Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada Siyaasada | 12/05/2024 | M/weynaha |
| 12. | Go'aanka Ansixinta Md. Maxamuud Yuusuf Cilmi Wasiir Ku-xigeenka W. Waxbarashada iyo Sayniska | 12/05/2024 | M/weynaha |
| 13. | Go'aanka Ansixinta Md. Saleebaan Jaamac Diiriye Wasiir Ku-xigeenka W. Horumarinta Maaliyada | 12/05/2024 | M/weynaha |
| 14. | Go'aanka Ansixinta Miisaaniyada Qaranka ee M/weynuhu soo celiyay | 29/07/2024 | M/weynaha |
| 15. | Go'aanka Ansixinta Xeerka Ciidanka Qaranka ee M/weynuhu soo celiyay | 30/07/2024 | M/weynaha |
| 16. | Go'aankii Ansixinta Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada Qalabka sida ee Guurtida ka soo noqday | 03/08/2024 | M/weynaha |
| 17. | Go'aanka Ansixinta Xeerka Hawlgabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada | 03/08/2024 | G/Guurtida |

**Ansixinta Soo celinta Miisaaniyada 2024ka ee Madaxweynaha.**

Golaha Wakiillada oo 03/03/2024 ansixiyay Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sannadka 2024ka una gudbiyay Madaxweynaha si uu dhaqangaliyo, laakiin Madaxwaynaha ayaa Golaha ku soo celiyay **17/03/2024** Wax ka badelkii ay Miisaaniyada ku sameeyeen, isagoo soo jeediyay in Wax ka badelkaas oo aanu sharciga waafaqsanayn.

Hadaba, Golaha Wakiillada oo ay hortaalay inuu ka aqbalo Madaxweynaha soo jeedintaas iyo inuu ku celiyo Cod aqlabiyad 2/3 ah (saddex meelood laba meelood tirade Xubnaha Golaha) ayaa muddo ka dibna Wuxuu Goluhu ku raacay soo jeedintiisa ah in wax ka badelkii Goluhu ka sameeyay laga noqdo **29/07/2024** ku ansixiyay sidaas Miisaaniyadii.

## WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka, Kheyraadka Dabiiciga, wax soo saarka iyo Tamarta
4. Gudidda Arrimaha Bulshada
5. Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska
6. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
7. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta iyo Maal-gashiga
8. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca
9. Gudidda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Technologyada
10. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay Golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan. Hadaba, iyadoo Gudi waliba Warbixineeda Golaha ka hor akhrin doonta waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii Gudiyada ee kal-fadhigii 8aad oo kooban.

### 1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Guddida joogtada iyo Ashaxu iyada oo Gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga sida uu dhigaayo Qodobka 53aad iyo Awoodaha uu qeexayo Xeer hoosaadka Golaha Wakiilada Waxa ay Guddidu Kal-fadhigii 8aad qabatay shaqooyin badan waxa ay kulamo la yeelatay Masuuliyiin kala duwan. Hadaba wax-qabadkii Gudidda oo kooban waxa uu ahaa sidan:-

**Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaran**

- Gudiddu waxay **06 August 2024** kulan la yeelatay Gudoomiyaha Bangiga Dhexe ***Md. Cali C/laahi Daahir***

- Gudiddu waxay **29 July 2024** kulan la yeelatay Wasiirka W. Horumarinta Maaliyada ***Dr. Sacad Cali Shire***

Masuuliyiinta Qaran ee ay Golewaynaha uga soo talo-bixisay

Gudigu waxay **12 May 2024** ka soo talo-bixisay

- Wasiirka Wasaarada Xidhiidhka Golayaasha iyo Dastuurka **Md. C/naasir Muxumed Xasan (Buuni)**

## 2. Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta

Gudidda Golaha u qaabilsan arrimaha Deegaanka, Khayraadka Dabiiciga ah, wax soo saarka iyo tamarta waxay Kulan ay yeelatay **00 May 2024** oo Gudoominayay Gudoomiyaha Gudiga Md. Saleebaan Maxamed Faarax (Goox) isla markaan Xubnaha Gudiga inta badan ka soo xaadireen ay ku naaqishtay shaqada gudiga u taala iyo sidii ay u qaban lahaayeen hawlaha u qorshaysan

Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaran

- Gudiddu waxay **15 May 2024** kulan la yeelatay Hay'adda ka hortaga Aafooyinka iyo Kaydka Raashinka Qaranka.

Masuuliyiinta Qaran ee ay Golewaynaha uga soo talo-bixisay

Gudigu waxay **12 May 2024** ka soo talo-bixisay

- Wasiirka Wasaarada Horumarinta Beeraha **Md. Axmed Maxamed Habane**
- Wasiir Ku-xigeenka Wasaarada Xanaanada Xoolaha **Md. Maxamed Maydhane Ibraahim**

## 3. Guddida Arimaha Bulshada

Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaran

- Gudiddu waxay **11 May 2024** kulan la yeelatay Hay'adda Shaqaalaha Dawlada.

Kulamadii Dadweyne ee Gudiddu qabatay

- Gudidda Arrimaha Bulshada oo gacanta ku haysay **Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada** si ay Golaha uga soo talo-bixiso, hadaba Gudiddu waxay Xeerkaas u qabatay laba kulan dadweyne (public legislative hearings) kuwaas oo ay ku kala qabatay ***Gobolka Awdal*** **01 May 2024,** halka ay **08 May 2024** sidoo ***Gobolka Tog-dheer*** ugu qabatay.

**Xeerarka Gudiddu Golewaynaha u soo gudbisay**

- Gudiddu waxay **26 June 2024** Golewaynaha u soo gudbisay warbixina ka siisay **Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawlada** oo ay ka soo shaqaysay, waxayna Mudanayaasha u sharaxday Wax ka badel iyo kaabis ay ku soo samaysay Xeerkaas.

**Masuuliyiinta Qaran ee ay Golewaynaha uga soo talo-bixisay**

Gudigu waxay **12 May 2024** ka soo talo-bixisay

- Wasiirka Wasaarada Ciyaaraha iyo Dhalinyarada **Md. C/risaaq Muuse Faarax**
- Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Waxrashada iyo Sayniska **Md. Maxamed Yuusuf Cilmi**
- Gudoomiye ku-xigeenka Hay'adda Shaqaalaha Dawlada **Md. C/laahi Axmed Faarax**

## 4. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

Gudidda Dastuurka, Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka Golaha u qaabilsani waxay Kulan ay yeelatay **08 May 2024** oo Gudoominayay Gudoomiyaha Gudiga Md. Jamaal Cali Aadam (Jaah) isla markaan Xubnaha Gudiga inta badan ka soo xaadireen ay ku naaqishtay shaqada gudiga u taala iyo sidii ay u qaban lahaayeen hawlaha u qorshaysan

**Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaran**

- Gudiddu waxay **03 July 2024** kulan la yeelatay Komishanka Xuquuqal Insaanka
- Gudiddu waxay **03 July 2024** kulan la yeelatay Taliyaha Ciidanka Asluubta S/Guuto Axmed Cawaale iyo Saraakiil Ciidankaas ka tirsan.

## 5. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

**Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaran**

- Gudiddu waxay **02 July 2024** kulan la Bahda Garsoorka iyo Ururka Qareenada Somaliland oo kala tashanaysay Xeerka Rahanka Hantida Ma-guurtada ah.
- Gudiddu waxay **03 July 2024** kulan la yeelatay Masuuliyiin ka socotay Baananka Ganacsiga Dalka oo kala tashanaysay Xeerka Rahanka Hantida Ma-guurtada ah.

**Kulamadii Dadweyne ee Gudiddu qabatay**

- Gudidda Dhaqaalaha iyo Maaliyada oo gacanta ku haysay Xeerka Rahanka Hantida Ma-guurtada ee Baananka ayaa **10 June 2024** kulan dadweyne (Public Legislative hearing).

**Masuuliyiinta Qaran ee ay Golewaynaha uga soo talo-bixisay**

Gudigu waxay **12 May 2024** ka soo talo-bixisay

- Wasiir Ku-xigeenka Wasaarada Horumarinta Maaliyada **Md. Saleebaana Jaamac Diiriye**

## 6. Guddida Arr. Dibadda, Iskaashiga Caalamiga ah, Qorshaynta iyo M/gashiga

**Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaran**

**Intii lagu jiray Kal-fadhiga 9aad Gudidda Arrimaha Dibadu waxay**

- Kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaranka **Md. Axmed Toorno.**
- Kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Maalgashiga **Md, C/risaaq Ibraahim**

## 7. Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada

**Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaran**

- Gudiddu **12 May 2024** waxay kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Isgaadhsiinta iyo Technology-ga **Md. Dr. Axmed Yuusuf Idiris**
- Gudiddu **12 May 2024** Wasiirka Wasaarada Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka **Md. Raabi Cabdi Muxumed.**
- Gudiddu **21 May 2024** waxay kulan la yeelatay Ururada Aan Dawliga Ahayn (Somaliland NGO Board Members)
- Gudiddu **09 July 2024** waxay kulan la yeelatay Saraakiil iyo Xildhibaano uu hogaaminayay Maayar ku-xigeenka Caasimada Hargeysa **Md Khadar Axmed Cumar (Khadar-Nuur).**

**Masuuliyiinta Qaran ee ay Golewaynaha uga soo talo-bixisay**

Gudigu waxay **12 May 2024** ka soo talo-bixisay

- Wasiirka Wasaarada Isgaadhsiinta iyo Technology-ga **Md. Dr. Axmed Yuusuf Idiris**
- Wasiirka Wasaarada Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka **Md. Raabi Cabdi Muxumed.**

## 8. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca

**Masuuliyiinta Qaran ee ay Golewaynaha uga soo talo-bixisay**

Gudigu waxay **12 May 2024** ka soo talo-bixisay

- Xubinta Komishanka Doorashooyinka Qaranka ee ah **Md. Siciid Maxamed X. Cismaan**
- Xubinta Gudidda Diiwaangalinta Ururada ee ah **Md. Cumar Cali C/laahi**
- Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga **Md. Dr. Rooble Cabdi Cilmi**

## 9. Gudidda Arrimaha Shareecada, Qoyska iyo Diinta

**Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaran**

- Gudiddu **28 May 2024** waxay Gudiga Wanaag farista iyo Xumaan Reebista.
- Gudiddu **28 May 2024** waxay Wasiirka Wasaarada Diinta iyo Awqaafta **Md. Maxmed X. Aadam Cilmi**

- Gudiddu **20 July 2024** waxay **Hablaha ka shaqeeya Dacwada iyo Fidinka khayrka oo ay ugu horayso Marwo Nasiiba Sh. Maxamuud Aadam SIiro.**

## Gudoomiyaha Golaha oo Xafiiskiisa kula kulmay Ururka SOLJA

Gudoomiyaha Golaha Wakiillada **Md. Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon**) ayaa **08 May 2024** Xafiiskiisa kulan kula yeeshay saraakiil ka socotay Ururka Suxufiyiinta Somaliland ee loo soo gaabiyo SOLJA, kulankaas oo ujeedadiisu ahayd sidii looga wada shaqayn lahaa Xeerka Saxaafada Somaliland oo diyaarintiisa socoto, sid xeerkaas u noqon lahaa mid wax wayn ka tara baahiyaha sharci ee Saxaafada Somaliland, waxayna Madaxda SOLJA iyo Gudoomiyuhu islagarteen hanaankii xeerkaas wax ka badelkiisa iyo kaabistaa looga wada qayb qaadan lahaa isla markaana si hufan ay uga wada shaqayn lahaayeen dhamaan hay'addaha ku shaqada lihi si xeerkaas oo hufan loo meel marin lahaa.



**Gudoomiyaha oo xafiiskiisa kula kulmaya Saraakiisha Ururka Saxafiyiina Somaliland ee SOLJA.**

## SAFARADII DIBADA LOO BAXAY

- **Safar Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad ku tagay Dalka Holland.**

**16 ilaa 24 Bishii May 2024,** Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha **Md. Siciid Mire Faarax (Giire)** ayaa safar shaqo ku tagay dalalka Holland iyo Jarmalka ee qaarada Yurub gaar ahaan Caasimadiisa Amisterdam, waxaana Gudoomiyaha halkaan si meeqaam sare ah ugu soo dhoweeyay Jaaliyada kala duwan ee reer Somaliland ee Qaarada Yurub ku dhaqan gaar ahaan dalka Holland, wuxuuna jaaliyada kala qaybgalay Xuska Maalinta dib ula soo noqoshada Madax-bannaanida Somaliland ee 18 May.

Waxa Gudoomiye ku-xigeenka 1aad safarkaas ku wehelinayay Xildhiaanad Marwo Aamina Cilmi Fariid, intii ay safarka ku joogeen Qaarada Yusub waxay booqdeen Xarunta Baarlamaanka Gobolka Bremen ee wadanka Jarmalka, waxaana halkaas ku soo dhweeyay Xildhibaano ka tirsan Baarlamaankaas Gobolka Bremen.



*Gudoomiye ku-xigeenka 1aad iyo Xildhibaan Aaamina C. Fariid ee Dalalka Holland iyo Jarmalka*

Gudoomiyaha ayaa madaxdii uu la kulmay ee Baarlamaanka kala hadlay in xidhiidhka ka dhaxeeya Labada Wadan kor loo Sii qaado isla markaana Xildhibaanada Baarlamaan Goboleedka Bremen ay hormuud ka ka noqdaan aqoonsiga Somaliland isla markaana Xoogga ku saaran Dawlada Jarmalka inay Qadiyada Madax-banaanida Somaliland ahmiyad gaara siiso madaama dawlada Somaliland horumar Balaadhan ku talaabsatay.

- **Wafti labada Aqal Baarlamaan ee Somaliland oo ka qayb-galay Caleemo Saarka Madaxweynaha Dalka Taiwan.**

**20 Bishii May 2024,** wafti balaadhan oo isugu jiray labada Aqal Baarlamaaan ee Somaliland iyo Xukuumada ayaa ka qayb-galay caleemo saarka Madaxweynaha cusub ee Dalka Taiwan, waftigan oo uu hogaaminayay Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Guurtida **Md. Siciid Jaamac Cali** kuna weheliyeen Gudoomiyaha Gudiga Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Golaha Wakiillada **Md. Maxamed Xasan Siciid iyo Md. Cumar Jaamac Faarax** oo Golaha Wakiillada ka tirsan, waxa kale oo dhinaca Xukuumada ka socday Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Arrimaha DIbada Marwo Rooda Jaamac Cilmi iyo Safiirka Somaliland ee Dalka Taiwan.



*Wafti Somaliland ee ka qayb-galay Caleemo Saarka Madaxweynaha Cusub ee Taiwan* Mr. Lai Ching-te,

Waftigan Somaliland ayay dalka Taiwan loogu soo dhoweeyay maamuus heerkeedu sareeyo, waxayna ugu horeyn ka **20 May** ka qayb-galeen Caleemo saarka Madaxweynaha cusub ee dalkaaas **Mr. Lai Ching-te,** waxayna waftiga somaliland ka mid ahaayeen wufuud ka kala socday 29 wadan oo caleemo saarkaas lagu casuumay. Intii Caleemo saarku socday waftiga Somaliland waxay kulamo kala duwan la yeesheen wufuudadaha kale ee ka soo qayb-galay caleemo saarkaa. Iyagoo Waftiga Somaliland **22 May** ay kulan gaar ah la yeesheen Madaxweynaha Cusub ee dalkaas Taiwan **Mr. Lai Ching-te,**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**

---